

Washington Apple Health

Xuquuqaha Maamulka Dhagaysiga iyo Wakhtiyada kamadambaysta ah

Adiga waxaad xaq u leedahay maamul dhagaysi hadii aadan nagu raacsanayn qaraarkeena kaas oo diidey, dhameeyay, ama bedelay ceymis kujiridaada Washington Apple Health.

- Waxaad haysataa 90 maalmood laga bilaabo taariikhda kuqoran dusha ogaysiisnaan si aad ugu codsato dhagaysi. Haddii aadan dhagaysi kucodsan gudaha 90 maalmood, waxaa dhici karta in aad weyso xaqaada aad u leedahay dhagaysi.
- Haddii aad doonaysid in aad sii wadatid ceymis kujiridaada inta lagu guda jiro hawsha dhagaysiga, kafiiri **ceymis kujirida** socotey **inta lagu guda jirey hawsha maamulka dhagaysiga** hoos.
- Adiga waxaad muraajaco kusamayn kartaa sharciyada dhagaysiga kujira Xeerka Maamulka Washington (WAC), cutubka 182-526.
- Waxaa dhici karta in aadan yeelan xaq dhagaysi ah hadii ceymis kujiridaada ladiido, dhammaato, ama isbedesho sababtoo ah qaanuunka gobolka ama dowlada wuu isbedelayaa wuxuuna isla markiiba isku si saameyn ugu yeelanayaa dhammaan dadka kuqoran barnaamijka (RCW 74.09.741(3)).

Haddii aad tahay qof dakhligiisu-yaryahay, Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha (CLEAR) ayaa dhici karta in uu kugu caawiyo helida caawimaad lacag la'aan oo sharci ah. Waxaad kacodsan kartaa boggaan intarnatka <http://nwjustice.org/clear-online>, ama:

- Haddii aad tahay qof kahooseeya da'ada 60 sanno, kawac Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha (CLEAR) lambarkaan 1-888-201-1014.
- Haddii aad tahay qof da'adiisu tahay 60 ama kaweyn, kawac Madaxa Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha lambarkaan 1-888-387-7111.

Ceymis kujirida socota inta lagu guda jiro hawsha maamulka dhagaysiga

- Waxaad awoodaa in aad haysatid ceymis kujiridaada inta lagu guda jiro hawsha dhagaysiga. haddii ogaysiiskaaga sheegayo in aynu dhammeyn doono ama bedeli doono ceymis kujiridaada Washington Apple Health, AMA uu sheegayo in aynu joojin doono, dhammeyn doono ama dhimi doono adeegahaaga hore loo ogolaaday.
- Si aad u hesho ceymis kujiridaada, waxa khasab kugu ah in aad dhagaysi kuweydiisato kahor taariikhda ay kujadwalaysantahay ceymis kujiridaada in ay dhammaato AMA gudaha 10 maalmaha kalandarka ah laga bilaabo taariikhda aad heshay ogaysiiska. Anaga waxaan u tixgelinaa ogaysiiska in lagu helay 5 maalmood kadib taariikhda kuqoran ogaysiiska, aan ka ahayn haddii aad natustid in aadan kuhelin gudaha mudada 5-maalin.
- Haddii aad hesho ceymis kujirid soconaysa ama adeegaha kadibna weyso dhagaysigaada, waxa dhici karta in ay khasab kugu noqoto in aad bixiso ayidaad lagu ayidayo 60 maalmood oo kamid ah ceymis kujirida socotay ama adeegaha
- Ma awoodid in aad heshid ceymis kujirid marka aad sugayso dhagaysi si aad u waajahdo diidista codsigaada Washington Apple Health.

Codsashada maamulid dhagaysi

Si loo codsado maamul dhagaysi, ama hadii aad doonaysid tarjumaan ama caawimaad kale si aad u codsato dhagaysi, samee mid kamid ah waxyaabahaan soo socda:

- Wac 1-877-501-2233 ama Gurigaada degaanka iyo xafiiska Adeega Bulshada (HCS).
- Wac 1-855-873-0642 ama xafiiskaada Maamulka Horumarinta Naafooyinka gudaha (DDA)
- Qor warqad ama buuxi foomka Codsashada Maamulka Dhagaysiga HCA 12-507 (taas oo laga helo boggaan intarnatka <http://www.hca.wa.gov/medicaid/forms>) iyo
 - Faakis ugu dir dhinaca 1-888-338-7410; AMA
 - Boosto u dir dhinaca:

CSD Customer Service Center
PO Box 11699
Tacoma, WA 98411-6699

Anaga waxaan muraajaco kusamayn doonaa dacwadaada ama xaaladaada kadibna waxaan isku dayi doonaa in aynu xalino mowduuca kahor dhagaysiga maxkamada.